# Notice of Privacy Practices (Ogeysiiska Xeerarka Asturnaanta)

Dhaqan-galaya Janaayo 2024

***Ogeysiiskani wuxuu sharxayaa sida Gobolka Washington Health Care Authority (Masuuliyiinta Daryeelka Caafimaadka, HCA, anaga, ama inagu) u isticmaalaan ama u faafiyaan macluumaadka caafimaad ee ku khuseeya adiga iyo sida aad u heli kartid macluumaadkan. Fadlan dib ugu fiiri si taxadir leh***

## Waa maxay sababta aan u helaayo ogeysiiskan?

HCA waxa ka go'an ilaalinta macluumaadkaaga caafimaad. Sharcigu wuxuu nooga baahan yahay inaan siino ogeysiiskan dhammaan xubnaha si aad u ogaan kartid sida anu isticmaali karno ama u faafin karno macluumaadkaaga. Ogeysiiskani ma saameynayo kuhaboonaanshahaaga adeegyada ama caymiska. Haddii aad ka qabtid wax su'aalo ah ogeysiiskan, fadlan la xidhiidh Xafiiska Asturnaanta HCA adoo iimayl uga diraya PrivacyOfficer@hca.wa.gov, ka wacaya 1-844-284-2149 ama qoraal udir Xafiiska Asturnaanta HCA, Health Care Authority (Masuuliyiinta Daryeelka Caafimaadka), P.O. Box 42704, Olympia, WA 98504-2704.

## Nuxurka

### 1 Xuquuqahaaga

**Waxaad xaq u leedahay:**

- Inaad heshid nuqulka diwaanada caafimaadkaaga iyo codsiyadaada.
- Inaad saxdid diwaanada caafimaadkaaga iyo codsiyadaada.
- Inaad codsatid wada-xidhiidh asturan.
- Inaad naga codsatid inaan xadidno macluumaadka aan bixino.
- Inaad heshid liiska (oo waxyaabo kareeban yihiin) kuwa aanu la wadaagnay macluumaadkaaga.
- Inaad heshid nuqulka ogeysiiska asturnaanta.
- Inaad dooratid qof ku matala adiga.
- Inaad gudbisid cabasho haddii aad aaminsan tahay in xuquuqahaaga asturnaanta la burburiyey.

➢ ***Booqo bogga 2 wixii macluumaad dheeriya***

### 2 Ikhtiyaaradaada

**Waxaad noo sheegi kartaa ikhtiyaaradaada khuseeya macluumaad caafimaad oo gaar oo aanu isticmaalno ama bixino. Tusaale, sida aanu:**

- Uga jawaabno su'aalaha caymiska ee qoyskaaga iyo asxaabtaada.
- U bixino gargaarka masiibo.

Kuma sameyno suuq-geyn adeegyadeena ama ma iibino macluumaadkaaga.

➢ ***Booqo bogga 3 wixii macluumaad dheeriya***

### 3 Isticmaalkayaga iyo Faafintayada

**Waxa laga yaabaa inaan u isticmaalno ama u faafino macluumaadkaaga sababahan:**

- Waxay caawisaa maareynta daaweynta daryeelka caafimaad ee aad heshid.
- Inaan maamulno haayadeena.
- Inaan bixino lacagta adeegyada caafimaadkaaga.
- Inaan maamulno qorshahaaga caafimaad.
- Waxay caawisaa arimaha caafimaadka iyo badqabka dadweynaha.
- In la sameeyo cilmi-baadhis.
- In loo hogaansamo sharciga.
- In aan ka jawaabno codsiyada xubnaha nudyaasha jidhka oo aan la shaqeyno baadhe caafimaad ama agaasime jinaaso.
- In wax laga qabto magdhowga shaqaalaha, fulinta sharciga, iyo codsiyada kale ee dawlada.
- In laga jawaabo dacwadaha iyo tallaabooyinka sharci.
- In la aqoonsado fursadaha horumarinta tayada.

➢ ***Booqo bogga 4 wixii macluumaad dheeriya***

**Markay noqoto macluumaadkaaga caafimaad, waxaad leedahay xuquuq gaara.** Qeybtani waxay sharaxaysaa xuquuqahaaga iyo qaar kamida masuuliyadaheena si aan kuu caawino. Haddii aad jeclaan lahayd inaad heshid xuquuqahaaga ama aad su'aalo kale ka qabtid macluumaadka caafimaadkaaga ee HCA hayso, fadlan la xidhiidh Xafiiska Asturnaanta HCA adoo iimay uga diraya **PrivacyOfficer@hca.wa.gov**, ka wacaya 1-844-284-2149 ama qoraal udir Xafiiska Asturnaanta HCA, Health Care Authority (Masuuliyiinta Daryeelka Caafimaadka), P.O. Box 42704, Olympia, WA 98504-2704.

**Waxaad xaq u leedahay:**

**Inaad heshid nuqulka diwaanada caafimaadkaaga iyo codsiyadaada**

Waxaad dib u fiirin kartaa macluumaadka shakhsi ee HCA kaa hayso adiga adoo ku weydiinaya, qoraal ahaan, helitaankiisa ama nuqulkiisa. Waxaan kaa qaadi karnaa khidmad lacagteed oo nuqulada ah. Marar badan, waxaanu ku siin doonaan nuqulada oo qaab elektarooniga ah markaad codsatid.

Marka laga reebo waxyaabaha ka reeban ee hoos lagu sheegay, halkan waxa ah diwaanada aad dib u fiirin kartid iyo nuqulka:

- Diwaangalinta, lacag-bixinta, xukunka codsiyada, iyo diwaanada maareynta caafimaad ama kiis ee ay hayso ama loogu talogalay HCA.
- Diwaanada kale ee HCA isticmaasho si ay u sameyso go'aamada ku khusaysa.

Macluumaad aad dib u fiirin kartid iyo nuqulka kuma jiraan:

- Qoraalada daaweynta-jidhka.
- Macluumaadka lagu ururiyey filashada macquulka ah ee, ama isticmaalka, tallaabooyinka ama dacwadaha shacabka, danbiyada, ama maamulka.
- Macluumaad HCA aanay sharciyan kaa faafin karin adiga.
- Macluumaadka laga helay qof aan ahayn daryeel-bixiye caafimaad oo qeybta ballan-qaadka asturnaanta ah haddii isticmaalka la codsaday ay macquul tahay inuu sheego meesha laga helay macluumaadka.
- Macluumaadka xirfadle daryeel caafimaad oo liisa haysta ama HCA go'aamiso waxa waajib ah inaan lagula wadaagin adiga waayo wuxuu khatar galiyanayaa adiga ama qofkale.

**Naga codso inaan saxno diwaanada caafimaadka iyo codsiyada**

- Waxaad naga codsan kartaa inaan waxka badelno macluumaadkaaga shakhsi haddii aad aamisan tahay inuu qaldan yahay ama aanu dhammeystirneyn. Waa inaad ku sameysaa codsiga qoraal ahaan, aqoonso macluumaadka aad rabtid inaad badeshid, oo sharax sababta ay tahay in loo badelo.
- HCA caadiyan loogam baahna inay sameyso isbadellada aad codsatid. Tusaale, HCA loogam baahna inay badesho macluumaadka aanay sameyn ama macuulaadka saxda ah. Haddii HCA aanay sameyn isbadelka aad codsatid, waxay kuu sheegi doontaa sababta. Haddii HCA aanay sameyn isbadellada, waxay sameyn doontaa dadaal macquula si ay u ogeysiiso dadka kale ee ay siisay macluumaadka ama dadka kale ee aad u sheegtid HCA inay heleen macluumaadka.

**Codso wada-xidhiidh asturan**

- Waxaad na weydiisan kartaa inaan kugula soo xidiidhno qaab gaara (tusaale ahaan, taleefan guri ama xafiis) ama inaan kuugusoo dirno boosto ciwaan kale.
- Waxaanu tixgalin doonaa dhammaan codsiyada macquulka ah, oo waa inaad tiraah "haa" haddii aad noo sheegtid inaad khatar galaysid haddii aananu sameyn.

**Codso xanibaado (xadid faafinta)**

- Waxaad naga codsan kartaa in aanaan u isticmaalin ama bixin macluumaad caafimaad oo gaara daaweyn, lacag-bixin, ama hawlayaga.
- Lanoogam baahna inaan ogolaano codsigaaga, oo waxaanu odhan karnaa "maya" haddii uu sameynayo daryeelkaaga.

**Hel liiska kuwa aanu la wadaagnay macluumaadka**
Waxaad sidoo kale codsan kartaa liiska haayadaha ay HCA siisay macluumaadkaaga. Liiska kuma jiri doonaan dhammaan faafintu. Tusaale ahaan, liisku ma lahaan doono:

- Faafinta daaweynta, lacag-bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaad.
- Faafintaada adiga ama ogolaanshahaaga.
- Faafinta la sameeyey wax kabadan lix sano kahor codsigaaga.

HCA waxay kaga jawaabi doontaa 60 maalmood gudohood codsigaaga. Haddii aad codsatid wax kabadan hal xisaabaad mudo kamida 12 bilood, HCA waxay kaa qaadi kartaa khidmad lacageed oo macquula.

**Hel nuqulka ogeysiiskan asturnaanta**

- Waxaad codsan kartaa nuqul warqad ah oo ogeysiiskan ah wakhti kasta, xataa haddii aad ogolaatay inaad ku heshid ogeysiiska elektaroonig ahaan. Waxaanu kuu siin doonaa nuqulka warqada ah si degdega.

**Dooro qof ku matala adiga**

- Haddii aad siisay qof ogolaanshaha qareenka caafimaad ama haddii qof yahay masuulkaaga sharci, qofkaasi wuxuu ku dhaqmi karaa xuquuqdaada wuxuuna sameyn karaa ikhtiyaarada macluumaadkaaga caafimaad.
- Waxaanu hubin doonaa in qofku haysto ogolaanshaha oo uu ku matali karo adiga kahor intaanaan qaadin wax tallaabo ah.

**Gudbi cabasho haddii aad is tidhaah xquuqdaadii ayaa lagu xadgudbay**
Haddii aad aamisan tahay in xuquuqdaada asturnaanta lagu xadgudbay ama aad su'aalo qabtid:

- La xidhiidh Xafiiska Asturnaanta HCA adoo iimayl uga diraya **PrivacyOfficer@hca.wa.gov**, ka wacaya 1-844-284-2149, ama qoraal udir Xafiiska Asturnaanta HCA, Health Care Authority (Masuuliyiinta Daryeelka Caafimaadka), P.O. Box 42704, Olympia, WA 98504-2704; AMA
- Waxaad u gudbin kartaa dacwad Xafiiska Adeegyada Bulshada iyo Department of Health (Waaxda Caafimaadka) Mareykanka wixii Xuquuqaha Shacabka adoo ugu diraya warqad 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, ka wacaya 1-877-696-6775,ama booqanaya **www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/**.
- Kaagama aar-goosan doono gudbinta cabashada.

## 5 Ikhtiyaaradaada

**Macluumaadka caafimaad qeybo kamida, waxaad noogu sheegi kartaa iikhtiyaarkaaga khuseeya waxaanu bixino.** Haddii aad haysatid doorasho cad oo khusaysa sida aanu u faafin karno macluumaadkaaga xaaladahan hoos lagu sharxay, nagala hadal. Noo sheeg waxaad rabtid inaan sameyno, waxaanu raaci doonaan tilmaamahaaga.

**Mararkan oo kale, waxaad leedahay labadaba xaqa iyo doorashada aad noogu sheegaysid inaan:**

- Siino macluumaadka qoyskaaga, asxaabta dhow, ama dadka kale ee ku lug leh bixinta lacagta daryeelkaaga.
- Bixino macluumaadka xaaladaha gargaarka masiibo.

*Haddii aanad awoodin inaad noo sheegtid ikhtiyaarkaaga, tusaale ahaan haddii aanad miyir-qabin, waanu iskasii wadanaynaa oo waxaanu la bixinaynaa macluumaadkaaga haddii aanu aaminsanahay inay ku jirto dantaadu. Waxaanu sidoo kale bixin karnaa macluumaadkaaga marka loo baahan yahay in lagu yareeyo khatar weyn oo kusoo socota caafimaadka ama badqabka.*

**Sidee ayaanu caadiyan u isticmaalnaa ama u bixin macluumaadkaaga caafimaad?** Waxaanu caadiyan u isticmaalnaa ama u bixinaa macluumaadkaaga caafimaad qaabab soo socda.

**Waxay caawisaa maareynta daaweynta daryeelka caafimaad ee aad heshid**

Tani waxa ku jira daryeelka lagu siiyey iyo isku-xidhka ama maareynta daryeelkaaga. Tusaale ahaan, HCA waxay u bixin kartaa macluumaadka si ay ugu wargaliso daryeel-bixiyahaaga caafimaad dhibaatooyin macquula oo kujira daryeelkaaga.

**Inaan maamulno haayadeena**

- Waxaanu u isticmaali karnaa oo u bixin karnaa macluumaadkaaga si aan u socodsiino haayadeena oo aan kuulasoo xidhiidhno markay daruuri tahay.
- Lanooma ogola inaan u isticmaalno macluumaadkaaga hidaside inaan ku go'aamino inaan ku siino caymis ama qiimaha caymiskaasi. Tani ma khusayso qorshayaasha long term care (daryeelka mudada-dheer).

***Tusaale:** Waxaanu u isticmaali doonaa macluumaadka caafimaad ee ku khuseeya si aan si fiican ugu horumarino adeegyada aad heshid.*

**Inaan bixino lacagta adeegyada caafimaadkaaga**

- Waxaanu isticmaali karnaa oo bixin karnaa macluumaadkaaga caafimaad markaanu bixinayno lacagta adeegyadaada caymiska caafimaad.

***Tusaale:** Waxaanu siin karnaa macluumaadkaaga dhakhtarkaaga si aan iskugu xidhno lacag-bixinta qaliinkaaga.*

- Haddii aad codsatid dhageysiga maamulka si dib loogu fiiriyo diidmada, waxaanu badanka faafinaa macluumaadka marka nidaamka dhageysiga.

**Sidee kale ayaanu u isticmaali ama bixin karnaa macluumaadkaaga caafimaad?** Waxa la noo ogol yahay ama lanooga baahan yahay inaan u bixino macluumaadkaaga qaabab kale – badanka qaababka ka qeybqaadanaya danaha guud, sida caafimaadka iyo cilmi-baadhista dadweynaha. Waa in aanu buuxinaa shuruudo badan oo sharciga ah kahor inta aanan u bixin macluumaadkaaga ujeedooyinkan. Wixii macluumaad dheeriya, ka fiiri: **hhs.gov/hipaa/for-individuals/guidance-materials-for-consumers/index.html**

**Waxay caawisaa arimaha caafimaadka iyo badqabka dadweynaha**

- Waxaanu bixin karnaa macluumadka caafimaad ee ku khuseeya xaalado gaar ah sida:
- Kahortaga xanuun.
- Ka caawinta soo-celinta alaab.
- Soo-sheegida falcelinta daran ee daawooyinka.
- Soo-sheegida xadgudubka, dayacaada, ama rabshadaha gudaha ee laga shakiyey.
- Kahortaga ama yareynta halis weyn oo caafimaadka ama badqabka qof ah.

**In la sameeyo cilmi-baadhis**

- Waxaanu u isticmaali karnaa ama u bixin karnaa macluumaadkaaga cilmi-baadhis caafimaad.

**In loo hogaansamo sharciga**

- Waxaanu bixin doonaa macluumaadka ku khuseeya adi haddii sharciyada gobolka ama fadaraalku u baahdaan, oo ay ku jiraan Department of Health (Waaxda Caafimaadka) iyo Adeegyada Bulshada haddii ay rabto inay ogaato inaan u hogaansamayno sharciga asturnaanta fadaraalka.

**In aan ka jawaabno codsiyada xubnaha nudyaasha jidhka oo aan la shaqeyno baadhe caafimaad ama agaasime jinaaso**

- Waxaanu la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad ee ku khuseeya haayadaha beerida xubnaha.
- Waxaanu la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad masuul, baadhe caafimaad, ama agaasime jinaaso marka shakhsigu dhinto.

**In wax laga qabto magdhowga shaqaalaha, fulinta sharciga, iyo codsiyada kale ee dawlada**

- Waxaanu u isticmaali karnaa ama u bixin karnaa macluumaadka caafimaad ee ku khuseeya:
    - o Codsiyada magdhowga shaqaalaha.
    - o Ujeedooyin fulin sharci ama fulin sharci oo rasmi ah.
    - o Wakaaladaha caafimaad ee hawlaha sharciga ogol yahay ku qabanaya.
    - o Shaqooyinka dawlada ee gaarka ah sida militariga, amniga qaranka, iyo adeegyada ilaalinta madaxweynaha.

**In laga jawaabo dacwadaha iyo tallaabooyinka sharci**

- Waxaanu u bixin karnaa macluumaadka caafimaad ee ku khuseeya inaan u jawaabno maxkamad ama amar maamul, ama jawaab yeedhmo.

**Miyey jiraan noocyo macluumaad oo gaar loo ilaaliyey?**

Haa, qaar kamida noocyada macluumaadka ayaa ku leh ilaalin adag sharciyada Gobolka Washington ama fadaraalka. Xeerarkan faafinta ee sare ma khuseeyaan noocyada macluumaadka gaarka loo ilaaliyey oo ay ku jiraan:

- Macluumaadka asturan ee la xidhiidha HIV ee ay ilaaliyeen shuruucda Gobolka Washington.
- Macluumaadka daaweynta alkahoosha iyo isticmaalka mukhaadaraadka ee ay ilaaliyeen shuruucda Gobolka Washington ama fadaraalku.
- Macluumaadka daaweynta caafimaadka dhimirka ee ay ilaaliyeen shuruucda Gobolka Washington ama fadaraalku.

## 7 Masuuliyadaheena

- Waxa uu nooga baahan yahay sharcigu inaan ilaalino asturnaanta iyo amaanka protected health information (macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyey).
- Waxaanu kuusoo ogeysiin doonaa si degdeg ah haddii sharci-jabin dhacdo taasoo ka tanaasulaysa asturnaanta ama amaanka macluumaadkaaga.
- Waa inaanu raacnaan waajibaadka iyo xeerarka asturnaanta ee lagu sharxay ogeysiiskan oo aanu ku siinaa nuqulka haddii aad codsatid.
- Uma isticmaali doono ama bixin doono macluumaadkaaga qaab aan ka ahayn sida aanu ku sharaxnay halkan ilaa aad noogu ogolaatid qoraal. Haddii aad noo ogolaatid, waxaad badeli kartaa go'aankaaga wakhti kasta. Noogusoo sheeg qoraan ahaan haddii aad badeshid go'aankaaga.

Wixii macluumaad dheeriya ka fiiri wabsaaydka dawlada fadaraalka: **hhs.gov/hipaa/for-individuals/notice-privacy-practices/index.html**.

**Isbadellada qodobada ogeysiiskan**

Waxaanu badeli karnaa qodobada ogeysiiskan, oo isbadelladu waxay qaban doonaan dhammaan macluumaadka aanu kaa hayno adiga. Waxaanu ku siin doonaa ogeysiis cusub, ama kuu sheegi doonaa arinta iyo sida loo helayo nuqulka.  Ogeysiiska dib loo fiiriyey waxa laga heli doonaa wabsaaydkeena, waxaanan kuugusoo diri doonaa iimayl ama boosto nuqulka markaad codsatid. Ogeysiiskani waxa lagu helayaa dhowr luuqadood; ka fiiri wabsaaydkeena **www.hca.wa.gov/pages/privacy.aspx**.